

Magaaladaada. Codkaaga.

Macluumaadka Doorashada

vote.minneapolismn.gov

Ku soo dhoawo hooygaaga cusub

Marka la guurayo wax badan bay tahay in la qabto, waxyaabo baa ku lumi kari ka la wareega. Yaanay waxyaabaha luma ka mid noqon is diiwan gelinta doorashada. Inkasata oo aad horay isu diiwaan gelisay, hadda oo aad yeelatay cinwaan cusub, waxaad u baahan tahay inaad cusboonaysid macluumaadkaaga is diiwaan gelinta.

Arji is-diiwaan gelin codaynta ah ayaa ku jira macluumaadkan. Is-diiwaan geli maanta si aad ugu diyaargarowdo doorashooyinka soo socda. Waxaad samayn kartaa inaad:

- Buuxiso Arjiga la socda warqaddan kuna dir boosta
- Buuxiso is-diiwaangelin internetka ee bogga cinwaankiisu yahay: vote.minneapolismn.gov/renter.

Waxaad is-diiwaan gelin kartaa kana codayn kartaa Minnesota haddii aad tahay:

- Muwaadin Maraykan ah.
- Maalinta codaynta da'daadu tahay ugu yaaraan 18 sano.
- Haddaad degantahay Minnesota ilaa 20 casho ka hor maalinta codaynta.
- Haddad dhamaysatay gebi ahaan xukun danbi aad u xidhnayd.
- Ka fiiri shuruudaha codaynta oo dhan boogan vote.minneapolismn.gov.

Ogow maalmaha doorashooyika sanadka 2016

Doorashooyinka Wareega Koobaad

- Maalinta codayntu waa Talaada, Agosto 9.
- Warqadaha codaynta maqanayaasha waxaad heli kartaa laga bilaabo Jimcaha, Juun 24.
- Maalinta u danbaysa is-diiwaan gelinta hore waa Talaada, Julay 19.*

Doorashada Guud

- Maalinta codayntu waa Talaada, Noofambar 8.
- Warqadaha codaynta maqanayaasha waxaa heli kartaa laga bilaabo Jimcaha, Sebtembar 23.
- Maalinta u danbaysa is diiwaan gelinta hore waa Talaada, Oktoobar 18.*

*Haddii ay ku dhaafto maalinta u danbaysa is-diiwaan gelinta hore, weli waad is diiwaan gelin kartaa oo codayn kartaa maalinta doorashadu dhacayso. Boogan ka fiiri caddaymaha lagaaga baahan yahay ciinwaankaaga iyo oqoonsigaaga vote.minneapolismn.gov/voters/ELECTION-DAY-REGISTER. Haddii aad mar hore is-diiwaan gelisid, waqtina kaa lumi maayo iyobaahi inaad goobta cod bixinta la timmaado warqado aqoonsi dheerad ah.

Wixii macluumaad dheeraada ah oo ku saabsan doorashooyinka iyo codaynta


Booqo bogga internetka doorashooyinka iyo codaynta ee magaalada Minneapolis:

vote.minneapolismn.gov or 311 at: www.minneapolismn.gov/311



BOOSTADA
MAAY QAADI
DOONTO HADDII
AYSAN LAHAYN
FARAANKA
BOOLADA DARA-
JADA KOOWAAD
(FIRST CLASS
POSTAGE)

RETURN TO: Minneapolis Elections & Voter Services
350 South 5th Steet, Room 201
Minneapolis, MN 55415-1355



Si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho doorashada ama natiijooyinka doorashooyinka waxaad eegtaa bogga internetka ee Xoghayaha Gobolka Minnesota www.sos.state.mn.us ama waxaad wacdaa khadka bilaashka ah ee **1-877-600-VOTE (1-877-600-8683)** ama waxaad wacdaa Adeegga Lalinta Wararka 1-800-627-3529 ama 711.

Warbixinta Waqtiga Kama Dambeysta ah

Waxaa hore isu sii diiwaan gelin kartaa cod bixinta ugu yaraan 20 maalmood doorashada ka hor. Haddii aadan awoodin in aad hore isu sii diiwaan geliso 20 maalmood doorashada ka hor, waa in aad iska diiwaan geliso goobta cod bixinta Maalinta Doorashada.

Arjiyada diiwaan gelinta cod bixinta waa in loo gudbiyo Hubiyaha Degmada ama Xoghayaha Gobolka 10 maalmood inta aan la gaarin ee taariikhda la saxiixo kaddib.

Caawimaad

Haddii laga codsado Hubiyaha Degmada ama Xafiiska Xoghayaha Gobolka waxaa laga helayaa Arjiyada Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha Minnesota oo farta waaweyn ku qoran.

Waxaa jira caawimaad gaar ah ee loogu talagalay waayeelka, dadka itaal darran, ama dadka ku nool xarumaha caafimaadka. Waxaad la soo xiriirtaa Xoghayaha Gobolka ama Hubiyaha Degmada si aad macluumaad dheeraad ah u hesho.

Arjiyada Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha oo luqado kale ku qoran ayaad ka helaysaa bogga internetka www.sos.state.mn.us.

Lambarkaaga Daryeelka Bulshada waxa laga dhigayaa mid ka qarsoon bulshada kale. Inta aadan sanduuqa 7 ku qorin 4taada lambar ee SSN-ka, waxaad fadlan akhrisaa ogeysiiska gaarka ah ee ku qoran bogga internetka www.sos.state.mn.us/home/index.asp?page=207.